

TALLAABOYINKA LAGU SUGO AMMAANKA XOGTA TALEEFOONKA (HOW TO SECURE YOUR MOBILE DEVICE)

Taleefoonka gacanta maanta wuxuu noqday mid muhiim u ah nolosha bini'aadamka, qofka bini'aadamka ah wuxuu maalintiisa ugu yaraan afar saacadood oo kamid waqtigiisa ku qaataa isticmaalka taleefoonka. Dadka isticmaala taleefoonka waxaa ugu jira xogo badan oo xasaasi ah taasoo ka kooban xiriir, qoraalo, sawiro, muuqaalo, codad, xusuuso, taariikh haye iyo macluumaadyo badan oo xasaasi ah kuwaasoo haddii telefoonku kaa lumo ama lagaa qaato khatar gelin karta qofka iyo dadka uu u shaqeeya ama ku xiran.

Marka loo yimaado dumarka si weyn ayey ugu tiirsan yihiin taleefoonka si ay shaqadooda ugu qabsadaan. Xog ururin la sameeyay waxay tilmaameysa in **74%** dumarku telefoonka u isticmaalaan si joogto ah. Hadaba iyadoo arintaas laga duulayo, waxaan halkaan hoose kusoo bandhigeyna tallaabooyinka aasaaska u noqon kara si loo ilaaliyo ammaanka iyo sugnaanshaha taleefanka gacanta.

Waxaa jira labo software oo telefoonada ugu badan adduunka ku shaqeeyaan, labadan software oo la kala dhaho **Android** oo ay ku shaqeeyaan taleefanada Samsung iyo **iOs** oo ku shaqeeyo telefoonka iPhone. Xog ururin aan dhowaan ku sameynay gabdhaha Soomaalida ah waxay tilmaameysa in **80.4%** inay isticmaalaan taleefoonada ku shaqeeya Android.



U Samee Fure-Sireed Adag Talefoonka



taabasho (Fingerprint/touch) ama wejiga lagu furto (Face ID) iyo weliba fure-sireed qoraal ah (Password).

Fure-sireedka waa furaha ammaanka taleefoonkaaga, haddii taleefoonkaagu lahayn quful ama fure-sireedka kuugu xiran yahay mid liita, waxaad ogaataa in xogta taleefoonkaagu ahayn mid ammaan ah. Hadaba, si aad uga ilaaliso in qof iska galo xogta taleefoonkaaga, waa inaad u sameyso fure-sireed taleefoonkaaga. Telefoonka wuxu leeyahay dhowr nooc oo fure ah sida lambar gaaban (PIN), jiid-jiid (Pattern),

Sida loogu xiranayo fure-sireed way ku kala duwan yihiin talefoonadu, laakiin telefoonada ku shaqeeya Android, waxaad tegaysaa **Settings-> Lock screen-> Screen lock type** kadibna halkaan ka dooro nooca fure aad ku xiraneyso taleefoonkaaga sida lambar gaaban, jiid-jiid, taabasho ama

wejiga lagu furto iyo weliba fure-sireedka qoraalka ah. Hadaad isticmaasho iPhone, waxaad tegaysaa **Settings->Touch ID [or Face ID] & Passcode**.


Fure-sireedka qoraalka ah (Password) waa furaha ugu ammaansan ee telefoonka lagu xirto, way dhici kartaa inay ku dhibto inaad mar walba geliso xuruuf iyo qoraal dheer si aad u furato telefoonkaaga. Laakiin ogow in furahani yahay kan ugu ammaanka badan hadaad dareemayso ama kujirto xaalad amni oo u baahan inaad taxadar muujiso.

Hadaad isticmaasho telefoonada ku shaqeeya Android, waxaa jira hab kale oo cajiib ah oo aad sii raacin karto fure-sireedka qoraalka ah si aad uga nasato inaad mar kasta furto, habkani waa inaad isticmaasho qafilka caqliga badan **Smart lock**, habkan wuxuu kuu saamaxaya in qafilka telefoonku furnaado mar kasta oo aad gacanta ku haysato ama aad ku xirto inuu furnaado mararka aad joogto meelo khaas ah sida markaad joogto gurigaaga. Telefoonada qaarkood waxayba ku siinayaan fursad dheeraad ah oo ay kamid yihiin inay kuugu furmaan codkaaga iyo garowsado wejigaaga.

Hadaad isticmaasho iPhone wuxuu ku siinayaa inaad fure-sireedka usii raaciso hubiye labaad (Two-factor authentication), si aad u furato adeegan waxaad tagtaa **Settings-> [Your name] -> Password & Security-> two-factor authentication** kadibna fur. Sidoo kale, waxaad ku dari kartaa xiriir (Contact) kale si uu kaaga caawiyo inaad lasoo laabato fure-sireedka Apple ID-gaaga hadduu kaa xirmo. Hadaba si aad u furato tag **Settings-> [your name] -> Password & Security-> Account Recovery-> Add Recovery Contact** kadibna raac tilmaamaha.

Intaas waxaa raaca hadaad isticmaasho iPhone, waxaad soo gelin kartaa qofka la wareegaya telefoonkaaga hadaad dhimato, qofkaas oo awood u yeelanaya inuu furto telefoonkaaga iyo akoonkaaga markaad dhimato. Si aad u furato adeegan waxaad tegaysaa **Settings-> [your name] -> Password & Security-> Legacy Contact-> Add Legacy Contact** kadibna raac tilmaamaha kusoo baxaya.

Ammaani Akoonada Taleefoonka



< Security and privacy

Security

Password

Change your outdated password



Recent account activity

No unchecked activity



Two-step verification

On



Account recovery methods

hadaba xogta telefoonka kuugu jirta ammaan maahan haddii akoonada kuugu xiran telefoonka aysan lahayn ammaan adag sida fure-sireed adag iyo hubiye labaad (Two-factor authentication).

Si aad u amaaniso akoonkaaga Google-ka ee taleefoonka, gal **Settings -> Security & privacy-> Accounts-> Google account security** haddii Samsung kusii raacsan yahayna sidaas oo kale u ammaani.

Siddaas si lamid hadaad isticmaasho iPhone, waa inaad taxadar ka muujiso markaad sameysaneyso Apple ID, kaasoo lagu geli xogtaada kala duwan ee telefoonka kuugu jirta iyo sidoo kale akoonkaaga kuugu xiran adeegyadan **App Store** iyo **Apple Music**. Marna hala wadaagin Apple ID-gaaga cid kale, xitaa dadka aad ku kalsoon tahay.

Ku Xafid Xogta Folder-Ka Ammaanka Ah



Hadaad isticmaasho Android, waxaad furan kartaa **Secure Folder** kaasoo ah goob ammaan ah oo leh fure-sireed adag oo lagu galo, waxaad halkaas ku guri kartaa oo isugu geyn kartaa xogta, sawirada iyo ablikeyshanada aad ilaalineyso ama khatar uga baqaysid. Mar kasta oo aad rabto inaad gasho folder-kan si aad u isticmaasho xogta kujirtaa ama kala soo baxdo ama ku darto wuxuu kaaga baahan yahay inaad ku gasho fure-sireed. Si aad u furato gal **Settings -> Security & privacy-> Security-> Secure Folder**.


Waa inaad markaad lasoo degto ama furato u sameysato fure-sireed adag si aysan cidna u gelin oo xogtaada u helin haddii telefoonku kaa lumo ama aad ku jirto xaalad adag oo halis ah.

Hubi Ablikeyshanada Isticmaalaya Akoonka Taleefoonka

Waxaa jira ablikeyshano badan oo aad u fasaxday inay kula isticmaalaan akoonkaaga telefoonka siiba Gmail-ka kuwaasoo awood u leh inay helaan xogta kuugu jirta telefoonka iyo guud ahaan dhaqdhaaqaaga telefoonka. Hadaba, si aad u oggaato ablikeyshanadan una hubiso waxaad tegaysaa **Settings -> Google-> Settings for Google apps-> Connected Apps**. Haddaad isticmaaleyso iPhone waxaad tegaysaa **Settings-> [Your name] -> Password & Security-> Apps Using Apple ID** si aad u hubiso ablikeyshanada isticmaalaya Apple ID-gaaga.

Ka Xir Ablikeyshanada Xogta Taleefoonka

Ablikeyshanada kuugu jira taleefoonka waxay awood u leeyihiin inay qaataan qaybo kamid ah xogtaada khaaska ah ee taleefoonka kuugu jirta hadaad siiso oggolaansho markaad soo degsaneyso. Hadaba, si aad u hubiso ablikeyshanada kala baxaya telefoonkaaga xogaha xasaasiga ah, hadaad isticmaasho Android waxaad tegaysaa **Settings -> Security & privacy-> Privacy-> Permission manager**. Hadaad isticmaasho iPhone, waxaad tegaysaa **Settings-> Privacy & Security** kadibna hubi qaybaha mid kasta oo kamid ah adeegyada gaar ahaanshaha (Privacy). Haddii kale soo fur **Settings** and kadibna hoos ugu deg meesha ay ku taxan yihiin ablikeyshanada si aad u kala hufto.



Hadaad isticmaasho Android, si aad uga joojiso ablikeyshanadan inay xogtaada qaataan waxaad tegaysaa **Settings -> Security & privacy-> Privacy-> Permission manager** kadibna mid mid ugu dhufo oo ka xir si aad ablikeyshanada uga joojiso isticmaalka xogtaada goonida ah. Hadaad isticmaasho iPhone, waxaad tegaysaa **Settings-> Privacy & Security-> Tracking-> Allow Apps to Request to Track** kadibna xir. Siddoo kale, tag **Settings-> Privacy & Security-> Apple Advertising-> Personalized Ads** kadibna iska xir xayeysiisyada.

Iska Ilaali Ablikeyshanada Tuugada Ah Ama Wasakheysan

Tuugada internet-ka waxay isticmaalaan ablikeyshano tuugo ah ama wasakheysan si markaad usoo degsato kuula isticmaalaan telefoonkaaga una helaan xogtaada. Hadaba, si aad isaga ilaaliso ablikeyshanadan tuugada ah ama wasakheysan waa inaad furato adeega **Google Play Protect** hadaad isticmaasho Android. Adeegan oo ku yimaada telefoonka Samsung wuxuu markaad furato si joogto ah baaris ugu sameynayaa ablikeyshanada kuugu jira telefoonka, wuxuuna ku siinayaa fariin digniin haddii ay jiraan ablikeyshano tuugo ah ama si xun uga faa'iideysanaya xogta telefoonkaaga. Si aad u furato waxaad tegaysaa **Settings -> Security & privacy-> App security-> Google Play Protect-> On all**.


F.G: Markaad lasoo degayso ablikeyshanada saddexaad ee aan ahayn kuwa lagu keenay telefoonka, hubi dibu-eegista lagu sameeyay ablikeyshinka iyo inuu haysto 5 xiddigood, mid taas kasii fiican waa inaad hubiso inta qof ee lasoo degtay oo intaba ka arkeyso markaad tagto ablikeyshanka Meesha aad kala soo degayso. Haddii uu haysto 5 xiddigood tirada lasoo degtayna aad u badan tahay, tallooyinka laga bixiyeyna yihiin kuwo ammaan ah, waad lasoo degi kartaa ablikeyshankaas laakiin waa inaad weli sii taxadarto.



Ka Ilaali In Taleefoonku La Socdo Dhaqdhaqaaqa

Si aad telefoonkaaga uga joojiso inuu duubo xogta la xiriirta meelaha aad booqato ama socodkaaga, hadaad isticmaasho Android waxaad tagtaa **Settings-> Privacy-> Google location history**. Hadaad isticmaasho iPhone waxaad tagtaa **Settings-> Mail-> Privacy Protection-> Protect Mail Activity** kadibna furo, tani waxay kuu suurtagelinaysaa in qofka fariinta kuso diray uusan arkin IP address-kaaga ama inaad furatay fariinta iyo in kale.

Iska-xir adeega **GPS location** ee telefoonka iyo weliba ablikeyshanada isticmaalaya **GPS location** telefoonkaaga markaad u baahnayn si aad isaga ilaaliso in dabagal lagugu sameeyo ama lagu soo raadsado iyadoo la isticmaalayo jiheeyaha telefoonkaaga. Ogow inay fiican tahay inaad iska xirto xitaa hadaad khatar ku jirin, tani waxay kuu dhaqaaleynaysaa dabka bateriga telefoonka. Si aad adeega **Location** uga xirto ablikeyshanada sida keli kelida ah u isticmaalaya, waxaad tegaysaa **Settings-> Location-> Location Services** si kuwo aadan rabin inay adeega location-ka isticmaalaan uga xirto kuwa kalena ugu deyso. Si aad kaamirada telefoonka uga xirto inay sawirada ku darto **GPS location** ama macluumaad la xiriira meesha laga qaaday iyo xilliga la qaaday ama xog intaas ka badan oo khatar kusoo jidi karta, waxaad tegaysaa **Camera-> Settings-> General-> Location tag** kadibna ka xir.




Iska-Xir Adeegyadan Markaan La Adeegsanayn

- Iska-xir **Bluetooth** markaad isticmaaleyn, inuu iska furan yahay waxaad leedahay khatar amni oo xogtaada waxyeeli karta ama lagugu soodiri karo fayras sun ah.
- Iska-xir khadka **Wireless** iyo midka **Mobile data** markaad isticmaaleyn haddaad ku sugan tahay xaalad khatar ah. Siddaas si lamid ah iska xir adeega wadaaga khadka

Tethering iyo **Hotspot** markaadan isticmaaleyn si aysan cid kale usoo gelin khadka telefoonkaaga.

- Iska-xir adeega **Near Field Communication (NFC)** markaadan isticmaaleyn si aysan u dhicin in xogtaada bankiga ama kaarka lacagta lagula bixin.

Cusbooneysi Ablikeyshanada Taleefoonka




Haddii software-ka ama ablikeyshanada telefoonkaaga aysan ahayn kuwo cusub oo mar kasta aan la cusbooneysiin, teleefoonkaagu wuxuu u nugul yahay khataraha kala duwan. Hadaba, waa inaad mar kasta ku sameyso cusbooneysiin software-ka iyo ablikeyshanada telefoonkaaga si aad u hesho adeegyada amni ee ugu danbeeyay. Si aad u cusbooneysiiso software-ka telefoonada ku shaqeeya Android, waxaad tegaysaa **Settings-> Software update-> Download and install.** Haddaad isticmaasho iPhone waxaad tegaysaa **Settings-> General-> Software Update.**

F.G: Ka dhig telefoonkaaga mid iskiis isku cusbooneysiya markuu helo khadka internet-ka si ay meesha uga baxdo inaad ilowdo cusbooneysiinta software-ka iyo ablikeyshanada telefoonka.


Furo Adeega “Soo Hel Taleefoonkayga”

Faa’iidooyinka ugu weyn ee taleefoonkaagu u leeyahay **GPS**, waa in hadduu kaa lumo ama lagaa xado aad ku raadin karto. Haddii isticmaasho telefoon ku shaqeeya Barnaamijka Android, waxaa kuu furan dhowr wado. Aaladaha qaar, sida Samsung, waa lagu keenaa adeegan – in kastoo si aad u isticmaasho ay tahay inaad akoon ka sameysato Samsung. Si aad u furato gal **Settings-> Security & privacy-> Find My Mobile-> Allow this phone to be found** kadibna raac tilmaamaha kusoo baxaya.

Hadaad furato adeegan waxaad awood u leedahay inaad raadiso telefoonkaaga adigoo telefoon kale ka gelaya webka <https://findmymobile.samsung.com/>. Ama taleefoonkaaga kula soo deg ablikeyshanka **Find My Device** adigoo gelaya **Settings-> Google-> Find My Mobile->Find My Mobile app.**



Ablikeyshankani wuxu kugu shaqeynayaa si lamid midka Samsung kujira, wuxuuna kaaga baahan yahay inaad ku gasho akoonkaaga Google-ka, kadibna marka taleefoonku kaa lumo gasho webka <https://myaccount.google.com/intro/find-your-phone>, kadibna waxaad awoodi kartaa inaad hesho meesha telefoonkaagu yaalo, xitaa inaad bedesho fure-sireedka ku xiran telefoonkaaga. Intaas waxaa raaca, haddii telefoonkaaga kaaga dhex lumo guriga, wuxuu ku siinaya inaad kaga dhawaajiso (Ring) xitaa haddii telefoonkaagu ku xiran yahay aamus (Silent).




Ablikeyshanadan waxaa keliya ku raadin kartaa telefoonkaaga haddii uu kuu furnaa location-ka sidoo kale ku xirnaa internet-ka. Haddii tuug xariif ah kaa xaday wuxuu sameyn karaa inuu horay ka demiyo dhammaan adeegyadan, si aadan u awoodin inaad soo raadiso telefoonkaaga. Hadaba, si telefoonkaaga aad u

hesho xitaa haddu khadka ka maqan yahay, waa inaad usii furto adigoo tegaya **Settings-> Security & privacy-> Find My Mobile-> Offline finding** kadibna furo adigoo raacaya tilmaamaha kusoo baxaya.

Haddii aad isticmaasho telefonka iPhone, keliya waxaad u baahan tahay inaad lasoo degto ablikeyshanka **Find My iPhone**. Markaad kusoo dejiso telefoonkaaga, waxaad awood u leedahay inaad raadiso telefoonkaaga adigoo isticmalaya webka <https://www.icloud.com/#find> kadibna kasii gelaya iCloud. Halkaas waxaad ka helaysaa meel aad taabato si aad u muujiso telefoonkaas kaa lumay, sidaasna ku xirto. Hadaad halkaas taabato oo ku xirto lumista, wuxuu ku siinaya fursad aad fariin ku dhigi karto telefoonkaaga kaa lumay, fariintaas oo aad ka dhigi karto mid u qoran sidan *“Telefoonkan waa iga lumay, fadlan igala soo xiriir +252-61-5610500 si aad iigu soo celiso”*. Haddiise aad ogtahay in telefoonkaaga la xaday waxaad tuuga qaatay shaashada telefoonka u saari kartaa fariin sida mid u qoran sidan *“Najis baa tahay, ogow inaad calfan doonin telefoonkaas”* ama wixii kale oo fariin ah oo maankaaga kusoo dhaca.

Tirtir Xogta Talefoonka Markuu Lumo Ama La Qaato


Tani tallaabada ugu danbeysa hadaad ka quusato inaad heli doonin telefoonkaaga. Waxaad tegi kartaa hadba ablikeyshanka kuu degsan **Find My Device/Find My iPhone** si aad u tirtirto xogta kuugu jirtay telefoonkaas isagoo kaa maqan oo aadan gacan ku hayn. Hadaad siddaan sameyso, xitaa haddii tuugo jebiyo telefoonkaaga ugu tegi maayo wax xog ah oo aad leedahay. Ogow markaad tallaabadan qaadeyso in telefoonkaas ka baxayaan



akoonadaada kuu saamaxayey inaad ku raadiso, sidaasna ku waayeyso inaad dib danbe u raadiso telefoonkaaga.


Haddii aad ku sugan tahay meel tuugo badan ama khatar amni kajirto oo aad ogtahay in maalin uun sidan kugu dhici karto oo xogtaada inaad tirtiro kugu khasbi karta, waxaad qaadan kartaa tallaabo inaad keydiso xogtaada intaad isticmaaleyso. Tusaale, hadaad isticmaaleyso Android waxaad ku keydin kartaa xog-keydiyaha **Drive**, adigoo gelaya **Settings-> Accounts & backup-> Google Drive**. Haddii aad isticmaaleyso iPhone waxaad ku keydsan kartaa keydiyaha **iCloud**, adigoo gelaya **Settings-> [Your name]-> iCloud**.

Ku Xir Telefoonka Inuu Iskiis Isku Tirtiro Markuu Lumo Ama La Qaato



Haddii aadan rabin inaad soo degsato ablikeyshanada lagu raadiyo telefoonka, ka baqeyso in haddii lagaa xado telefoonkaaga ama lagaa qaato la helo xogtaada kujirto telefoonka waxaad furan kartaa adeega **Auto factory reset** kaasoo kuu oggolaanaya in telefoonkaagu si iskiis ah isku tirtiro kuna laabto siddii uu warshada kaga soo baxay kadib marka qofka qaatay 20 jeer ku celceliyo furo khaldan isagoo doonaya inuu furto telefoonka. Hadaad isticmaasho Android, si aad u furato adeegan waxaad tegaysaa **Settings-> Lock screen-> Secure lock settings-> On/off**.

Haddii adeegan aad furato oo aad ka baqeyso in ciyaalka ama saaxiibada kugu dhow markay ku celceliyaan furo khaldan telefoonkaaga siddaas isku tirtiro, waxaad furan kartaa adeega qafilka caaqilka ah **Smart Lock** oo kuu sahlaya inaad telefoonkaaga ku xirto inuu furnaado ama bilaa fure ahaado markaad joogto meelaha aad ku kalsoon tahay sida gurigaaga, xaafadaada ama goob shaah laga cabo oo saaxiibada ku kulantaan. Halka uu xirnaanayo inta kale oo dhan marka laga reebo goobahaas aad dooratay. Si aad u furato adeegan waxaad tegaysaa **Settings-> lock screen-> Smart lock-> Off all**.



Tallaabooyin Dheeri Ah

Waxaa lagama maarmaan ah inaad fuliso tallaabooyinka soo socda si aad usii adkeyso ammaanka telefonkaaga iyo ineysan khatar ku iman xogta kuugu jirta telefoonka:

- Ka ilaali telefoonkaaga in cid kale kula isticmaasho si xogta kuugu jirto u xafidnaato, marna telefoonkaaga ha u dhiibin qof kale xitaa hadaad ku kalsoon tahay.

- Isticmaal galka telefoonka la gelayo siiba midka leh daboolka lagu qariyo kaamirada.
- Isticmaal dhalada qarineysa xogta qofka markuu isticmaalayo telefoonka, taasoo la dhaho dhalada qarsoodiga (Privacy screen protector).
- Telefoonkaaga haku xirin khad internet aadan hubin ama ku kalsoonayn ammaankiisa, siiba inaad telefoonkaaga ku xiran khadka furan ee aan furaha lahayn ee laga helo goobaha dadweynaha sida meelaha shaaha laga cabo, garoonada iyo meelaha kale ee dadweynaha.
- Telefoonkaaga haku xiriirin adigoo dab ka qaadanaya kambuyuutar aadan lahayn ama aan gacantaada kujirin oo aadan arkeyn waxa lagu sameynayo xogta telefoonkaaga.